



PORTRLAND PUBLIC SCHOOLS

501 N Dixon | Portland, OR 97227 | www.pps.net | pubinfo@pps.net | (503) 916-2000

Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Wargalinta Susan Kosmala oo noqoneysa maamulaha cusub ee Jackson

Maayo 2019

Gacaliye Waalidiinta Jackson,

Waxaan ku faraxsanahay in aan idin wargaliyo in Susan Kosmala noqon doonto maamulaha cusub ee Dugsiga Dhexe Jackson. Susan waxa leedahay sooyaal dheer oo ah Dugsiyada Dadweynaha Portland iyada oo maamule ka soo ahayd Dugsiga Hoose ee Buckman afartii sanno ee u dambeeyey.

Susan waxa ay xilka kala wareegi doontaa Kevin Crotchett, oo dhammeysanaya sanadkii lixaad ee uu maamule ka ahaa Jackson. Kevin waxaa loo bedelay Xarunta Xafiiska Dhexe isaga oo noqonaya Agaasimaha Barashada Teknoolajiyada. Wuxaan jecelahay in aan u mahadceliyo Kevin hawlihi fiicnaa ee uu ka soo qabtay iskuulka, iyada oo aan ka rajeynayo inuu ku soo kordhin doon dadaalo fara badan shaqadani cusub ee loo magacaabay ee ka mid ah waaxda Farsamada Macluumaadka.



Susan Kosmala

Mudaddii 15 sanno ahayd ee ay Susan ka shaqeyneysay Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS), waxa ay soo qabatay jagooyin kala gedisan kuwaasi oo qaabeeyey hoggaaminteeda iskuulada taasi oo noqon doonto qofkii ugu haboonaa inay maamule ka noqoto iskuulka Jackson. Markii ay maamulaha ka ahayd Buckman waxa ay ahayd qofkii qorsheeyey inay sameyso qorsho lagu taageerayo ardayda oo dhinaca wax-akhriska ah, taasi oo lagu badhxay waxyaabo caawinaya dhinaca akhlaaqda iyo in shaqada ay qabanayaan ardaydu tahay mid loo siman yahay, taasi waxa ay ugu yaraan meesha ka saartay faraqii anshax marinta ardayda kala jinsiga duwan. Wuxaan si gundheer uga qeybqaadatay barnaamij laga fuliyey dugsiga Buckman oo ahaa farshaxan farsameysan oo lagu habeeyey kumbuyuutar, kaasi oo ay soo ururiyeen shaqaalahi iyo waalidiinta sidii ay ugu taageeraha lahaayeen teknoolaji isku dhafan oo fasalada loo dhigayo sidii uu noqon lahaa barnaamij farshaxan.

Susan ka hore intii aanay tegin iskuulka Buckman waxa ay maamule-xigeen ka ahayd Dugsiga Jason Lee, oo waqtigaasi ahaa iskuul K-8. Susan waxa ay soo hoggaamisay qeybta qorsheynta jawaab ka bixinta arrimaha degdega ah, nidaamyada habdhqaanka iyo ballaarinta AVID laga bilaabo dugsiyada dhexe ilaa intii la gaarsiinayey dhammaan iskuulada oo dhan. Susan waxa kale oo ay soo qabatay xilal dhinaca maamulka ah oo degmada ah, sida Iskuulada Jartarka ah, Maamulka Barnaamijka Title I iyo Maareeyaha Maalgalinta Barnaamijyada.

Susan shaqadeeda dhinaca waxbarashada waxa ay ka bilowday in ay noqoto macalin dhiga maadadda muusikada ka soo dhigay gobolada Pennsylvania, Michigan iyo Maine ka hore intii aanay u soo guurin sanadkii 2001 gobolka 2001 oo ay bare ka noqotay magaalada Salem. Susan waxa ay shahaadada koowaad ku qaadatay Waxbarashada Muusigada Jaamacada Hartford, iyada oo Shahaadada Labaadna ku qaataay Hoggaaminta Waxbarashada Farshaxanka Jaamacada Michigan.

Fadlan igala qeybqaado soo dhaweynta Maamule Kosmala ee Dugsiga Dhexe ee Jackson.

Keeley Simpson
Ku-xigaha Guddoomiyaha Waxbarashada Nawaaxiga

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.